

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. JSL/M/DECM/249-1656/072009

DATE 29/07/09

DECREETO MADAXWEYNE NO: 391/072009

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu Helay: Go'aanka GW, Go'aan Lr. GW/KF-009/452/2009 ee ku suntan 26/07/2009 iyo Go'aan GG, Go'aan Lr. 03/kal-fadhiga 38aad/07/09 ee 22/07/2009 kaasi oo ay ku ansixiyeen Mashruuca Wax-ka-beddelka Xeerka Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka & Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2001.

Wuxuu Soo Saaray

Mashruucan oo lagu baahinayo dhaqan-galka wax-ka-bedelka iyo kaabidda lifaaqa u ah Xeerka Doorashooyinka (Xeer Lr: 20/2001)

Allaa Mahad Leh

Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweynaha JSL



Ardufooyah
Xaal
22/07/2009

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

RL:35
RECEIVED
02/06/09
H. H. H.

REF. JSL/M/SHGW/081-1600/072009

DATE 01/07/09

Ku: Shir-guddoonka Golaha Wakiilada

Hargeysa,

Ku: Shir-guddoonka Golaha Guurtida

Hargeysa.

Mudanayaal,

Markaan Arkay, dersay, ka baaraan-degay: soo jeedinta wax ka-beddelka iyo kaabista Xeerk Doorashada Goleyaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada (Xeer Lr. 20/2001), ee ay ii soo gudbiyeen Komishanka Doorashooyinka Qaranku, iyagoo ka duulaya tallooyinkii Axaabta Qaranka, isla makraana uu qayb ka yahay heshiiska Axaabtu kala saxeexdeen.

Markaan Tixgeliyey: Baahida loo qabo in la waafajiyo nidaamka cusub ee diiwaangelinta, qodobada wax ka bedelka laga soo jeediyey waxay ku salaysan yihiin nidaamka diiwaangelinta, liistada codbixiyayaasha, waraaqaha codbixinta, shuruudaha codbixiyaha iwm.

Markaan ku qancay: In ay lagama maarmaan ay tahay in la helo, wax-ka beddel lifaaq u noqon doona XEER-LAMBAR 20/2001.

Markaan Garawsaday: Baahida loo qabo in laga taxadiro dib-u-dhac dambe oo ku yimaada Doorashada Madaxtooyada Dalka JSL.

Waxan soo jeedinayaa

In wax-ka beddelkani iyo kaabista Xeerka Doorashada Goleyaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada (Xeer Lr. 20/2001) aad muhiimadda koowaad siisaan oo si dhakhso ah u ansixisaan, maadaama uu khuseeyo doorashada foodda innagu soo haysa ee Madaxtooyada JSL.

Allaa Mahad Leh
Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweynaha JSL



SOO JEEDINTA WAX-KA-BEDELKA IYO KAABISTA

XEERKA DOORASHADA GOLEYAASHA DEGAANKA IYO MADAXTOOYADA (XEER Lr. 20/2001):

Soo jeedintan wax-ka-beddel amariyo kaabiseed waxay saamayn ku yeelanaysaa qodobbada 5, 6, 28, 37(1), 37(3), 37(5), 37(6), 39, 45, 47, 51(1), 51(4), 51(5), 54, 55(3), 56(3), 57, 58(1), 58(2), iyo 58(3) ee Xeerka Doorashada Goleyaasha Degaanka iyo Madaxtooyada (Xeer Lr. 20/2001).

Qodobka 5aad:

Shuruudaha cod-bixiyaha.

Qodobka 5aad ee Xeerka oo ku saabsan shuruudaha cod-bixiyaha waxa lagu kordhiyey faqrad 4aad oo cusub oo u qormaysa sidan:

- 4. Waa inuu yahay cod-bixiye ka diiwaan-gashan goobta uu ka codaynayo, haddii aanu ka mid ahayn hawladeennada xafiiska goobta codbixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta ama ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka goobta codbixinta.*

Qodobka 6aad:

Xuquuqda Cod-bixiyaha.

Qodobka 6aad ee Xeerka oo ku saabsan xuquuqda cod-bixiyaha, faqraddiisa 1aad, waxa loo beddeley sidan:

- 1. Inuu codkiisa ka diibto goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaan-gashan yahay*

Isla qodobka 6aad ee xeerka waxa lagu kordhiyey faqrad 6aad oo cusub oo u qormaysa sidan:

- 6. Hawlwadeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu waxay ka codayn karaan goobta codbixineed ee ay ka hawlgelayaan maalinta cod-bixinta.*

Qodobka 28aad:

Bilawga iyo Dhammaadka Ololaha Doorashada

Qodobka 28aad ee xeerka oo ku saabsan bilawga iyo dhammaadka ololaha doorashada, waxa laga dhigay faqradda 1aad ee qodobka; waxaana qodobkaas lagu kordhiyey faqrad 2aad oo cusub oo u qormaysa sidan:

- 2. Haddii muddada olole Doorasho ku beegmo bisha barakaysan ee Ramadaan, si xisbigii doonaa uu miisaanka ololihiisa uga soo hormariyo bisha Ramadaan, waxa ololaha Doorashadu bilaabmayaa 60 (lixdan) maalmood ka hor maalinta cod-bixinta, waxaana dhammaanayaa 48 saacadood ka hor maalinta cod-bixinta.*



Qodobka 37^{aad}:
Qalabka Xafiiska Doorashada.

- 1) Qodobka 37aad, farqadiisa 1aad ee xeerka oo ku saabsan Qalabka Xafiiska Doorashada ee goobta waxa lagu kordhiyey saddex xubnood oo cusub oo kala ah "i", "m" iyo "n" waxaanay u qormayaan sidan:

l) liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha loo qoondeeyey inay codkooda ka dhiibtaan goobta cod-bixineed;

m) Mastarad aanu dheererkeedu ka yaraanin khaanadaha liiska ee cod-bixiyaha macluumaadkiisu ku qoran yihiin;

n) Aalad gaar ah oo lagu dalooliyo kaadhahka cod-bixiyeyaasha (special instrument for punching voters' cards).

- 2) Qodobka 37aad, farqadiisa 3aad ee xeerka oo ku saabsan Qalabka Xafiiska Doorashada ee Degmada/Gobolka waxa lagu kordhiyey xubin cusub oo ah "f" oo u qormaysa sidan:

f. Liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha degmada/gobolka.

- 3) Qodobka 37aad, farqadiisa 5aad ee xeerka oo ku saabsan in Komishanku waraaqo dheeraad ah u diyaarinayo xafiisyadooda degmo/gobol, waxa loo beddeley sidan:

5. a. Komishanku wuxuu tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta codbixinta ku jaan-go'anayaa tirada cod-bixiyeyaasha goobta cod-bixinta ee ku cad liiska rasmiga ah ee cod-bixiyeyaasha goobtaas cod-bixineed oo lagu daray tirada dadka ka hawlgelaya goobta cod-bixinta oo ka kooban hawladeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka boliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixinta.

b. Komishanku wuxuu goob kasta oo cod-bixineed u diyaarinayaa waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah oo aanay tiradoodu ka badnayn 2% tirada waraaqaha ee ku xusan xubinta "a" ee farqaddan, lambarradooda iyo goobaha cod-bixineed ee loo kala dirayana lagu qorayo diiwaan gaar ah oo Komishanka Doorashooyinka Qaranku leeyahay; waxaana goobta loogu ridayaa baqshad xidhan oo gaar ah oo lagu rido sanduuqa doorashada ee goobta cod-bixineed.

c. Waraaqaha dheeraadka ah waxa loo adeegsanayaa oo keliya beddelaadda waraaqaha cod-bixineed ee xumaada intaan lagu codeyn, taas oo ay waajib tahay in ay ku wada qancaan gudoomiyaha iyo wakiilada axsaabta u jooga goobta codbixinta. Mar kasta oo warqad ka mid ah waraaqaha dheeraadka ah lagu codeeyana waa in la diiwaan-gelinayaa asbaabaha kalifay.

- 4) Qodobka 37aad, farqadiisa 6aad ee xeerka oo ku saabsanayd in meelaha is-gaadhsiintu adag tahay loogu dhiibi karo waraaqo dheeraad ah kormeerka doorashada waa la tirtiray gabi ahaanba.



Qodobka 39^{aad}:

qodobka 39^{aad} ee xeerka oo ku saabsan habaynta goobaha codbixinta waxa lagu kordhiyey farqad 3aad oo cusub oo ku saabsan habaynta liisaska rasmiga ah ee codbixiyayaasha, waxayna u qormaysaa sidan:

3. Liiska dadka ka diiwaan-gashan isku goob doorasho, waxay qoraal ahaan u kala horreynayaan siday xuruuftu u kala horreeyaan iyadoo laga duulayo magacooda 1^{aad} haddii ay ku kala bixi waayaana magacooda 2^{aad}, hadii ay kaas ku kala bixi waayaana kooda 3^{aad}, haddii kaas ka sinmaanna kooda 4^{aad}.

Sidaa awgeed, qodobka 39aad waxa loo sameeyay cinwaan cusub oo noqonaya sidan:

"Habaynta Liisaska rasmiga ah iyo goobaha codbixineed"

Qodobka 45^{aad}:

Tallaabooyinka ka Horreeya Cod-bixinta.

Qodobka 45^{aad} ee Xeerka oo ku saabsan tallaabooyinka ka horreeya cod-bixinta waxa loo beddeley sidan:

Cod-bixiyuhu wuxuu codkiisa dhiiban karaa ka dib marka:

1. uu kaadhkiisa cod-bixinta u dhiibo Guddoomiye-Ku-Xigeenka goobta Cod-bixinta (ahna labada hubiye kooda da'da weyn), si uu u hubiyo inuu yahay kaadh cod-bixineed oo sax (valid) ah, horena aan loogu soo codeyn, isla markaana hubiyo in far-yaradiisa bidix, haddii aanu lahayna far-yaradiisa midig, haddii aanu taana lahayna meelaha muuqda ee jidkiisa inaanu kaga oollin khadka aan masaxmini, dabadeedna uu kaadhka ugu gudbiyo xoghayaha goobta, iyadoo ay kaadhka isha sii marinayaan wakiillada xisbiyadu.
2. uu xoghayaha goobtu ka helo magaca kaadhka ku qoran liiska rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha goobta, isla markaana uu hubiyo inay is waafaqsan yihiin lambarka kaadhka ku qoran iyo lambarka kaadhka ugu diiwaan-gashan liiska cod-bixiyayaashu, dabadeedna uu codbixiyuhu suulka bidix saaro meesha liiska cod-bixiyayaasha ah ee loogu tala-galay.
3. uu tallaabooyinka faqrada sare ee qodobkan ku xusan u gutto si dhamaystiran oo nidaamka waafaqsan, kuna wada qancaan hawladeenada iyo wakiilada Axsaabta ee goobta codbixinta ku sugani ayaa cod-bixiyaha loo goyn karaa warqadda cod-bixinta.

Qodobka 47^{aad}:

Nidaamka Cod-bixinta.

Qodobka 47^{aad} ee xeerka oo ku saabsan nidaamka cod-bixinta waxa loo beddeley sidan:

1. Marka la dhammays-tiro hawlaha ku xusan qodobka 45^{aad} ee cusub (as amended) ayuu xoghayuhu
 - a) cod-bixiyaha u goynayaa warqadda codbixinta isagoo xaqiijinaya in dabadii hadhaaga ahayd ee warqadda cod-bixineed ku hadhay buugga, u shaambadaynayaa, kuna wareejinayaa si uu ugu soo codeeyo;



- b) kaadhka cod-bixiyaha u gudbinayaa Hubiyaha kale ee goobta;
- c) xariijin ka tallaabinayaa magaca cod-bixiyaha iyo dhammaan xogta kale ee cod-bixiyaha ee ku qoran khaanadaha cod-bixiyahaas ee liiska, isagoo adeegsanaya mastaradda iyo qalin, ilaaliyana in magaca cod-bixiyaha iyo xogtiisa kaleba la akhriyi karo xariijin-marinta ka dib.
2. Haddii uu arko cod-bixiyuhu intaanu codayn in warqadda cod-bixintu aanay dhammayn ama ay jeexan tahay, wuu soo celinayaa, waxaanu codsanayaa in loo beddelo, dhacdadaasna waa in la diiwaan-geliyaa.
3. Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed gelayaa qolka yar ee waraaqaha lagu soo calaamadiyo.
4. Isagoo adeegsanaya mid ka mid ah qalimmada goobta, ayuu cod-bixiyuhu calaamadinayaa meel ka mid ah qaybta warqadda ee u gaarka ah xisbiga/musharraxa uu doonayo inuu u codeeyo, dabadeedna uu soo laalaabayaa warqadda kana soo baxayaa qolka calaamadinta warqadda.
5. Intaa ka dib ayuu cod-bixiyuhu wuxuu ku ridayaa warqaddisa cod-bixinta sanduuqa cod-codbixinta.
6. Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed u imanayaa Hubiyaha labaad ee loo soo gudbiyey kaadhkiisa, kaasoo far-yaradiisa bidix u marinaya khadka aan masaxmin, haddii aanu far-yaro bidix lahayna, far-yarada gacanta midig, haddii aanu labada far-yaro midna lahayna farta kale ee u soo xigta iyadoo gacanta bidix mudnaanta khadaynta la siinayo, haddii aanu labada gacmood midna lahayna meeshii kale ee jidhkiisa ah ee muuqanaysa.
7. Intaas ka dib ayuu hubiyaha labaad siinayaa cod-bixiyaha kaadhkiisii oo uu dalooliyey, isagoo adeegsadey aaladda loogu tala-galay daloolinta kaadhahka, cod-bixiyuhuna uu si degdeg ah uga baxayaa goobta cod-bixinta isagoo anshaxa dhawraya.
8. Qof kasta oo ka mid ah hawlwadeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka boliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu, wuxuu codkiisa dhiiban karaa (isagoo u maraya tallaabooyinka ku xusan 1 – 6 ee qodobkan) Isla marka goobta cod-bixinta la diyaariyo, ee hawlwadeennada Goobta cod-bixinta iyo wakiillada xisbiyada ee goobta cod-bixintu ay isla hubiyaan in kaadhka qofkaasi yahay mid sax (valid) ah horena aan loogu soo codayn, foomka uu Komishanka Doorashooyinka Qaranku u soo diyaariyeyna lagu qoro:
- a) magaciisa oo afarran;
- b) lambarka iyo magaca goobta uu ka diiwaangashan yahay;
- c) lambarka iyo magaca goobta uu ka codaynayo;
- d) xilka uu ka hayo goobta cod-bixinta;



e) saxeexa suulkiisa bidixna uu dhiga meesha foomka loogaga talo-galay.

9. Qof kasta oo ka mid ah dadka ku xusan faqradda 8^{aad} ee qodobkan waxa kaadhkiisa codbixinta haynaya, ka dib murkuu hubiyaha 2^{aad} dalooliyo, Guddoomiyaha goobta codbixinta oo dib u siin karaa uun ka dib marka la soo gebagebeeyo hawsha doorasho ee goobta cod-bixinta.
10. Guddoomiyaha goobtu wuxuu ku ilaalinayaa hawlwadeennada kale ee Xafiiska doorasho ee goobta gudashada xilkooda, waxaanu u gacan-bannaanaanayaa kala-socodsiiinta hawsha goobta.
11. Guddoomiyuhu wuxuu awood u leeyahay inuu debedda uga saaro cod-bixiyaha cudur-daar la'aan dhex meeraysta goobta iyo inuu cod-bixiyahaas dib uga soo celiyo warqadda cod-bixinta. Cod-bixiyahaas waxa loo oggolaanayaa inuu codkiisa dhiibto ka dib marka dadka safka taagani codkooda wada dhiibtaan.
12. Haddii uu cod-bixiye la yimaaddo goob cod-bixineed kaadh aan waafaqsanayn goobtaas, Guddoomiyuhu wuxuu u tilmaamayaa goobta cod-bixineed ee uu kaadhkiisu waafaqsan yahay.
13. Cod-bixiye kasta oo sita kaadh cod-bixineed oo aanu lahayn ama waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah ama ka duwan kuwa la isticmaalayo, Guddoomiyuhu wuxuu si degdeg ah u amrayaa in laga qaado, hadday suurto-gal u noqotana wuxuu u dhiibayaa ciidanka nabadgelyada si dacwad loogu oogo, dhacdadaasna qoraal ayaa lagu diiwaan-gelinayaa.

Qodobka 51^{aad}:

Tirinta Codadka.

- 1) Qodobka 51^{aad}, farqadiisa 1^{aad} ee xeerka ee ka hadlaya nidaamka tirinta codadka, ereyga "laba" ee ku qoran weedha labaad ee farqaddan waxa loo beddeley "hal".
- 2) Qodobbada 51^{aad}, farqadihiisa 4^{aad} iyo 5^{aad} ee xeerka ee ka hadlaya baqshadaha lagu kala ridayo codadka xumaaday ee wax-kama-jiraanka laga dhigay, codadka lagu muransan yahay iyo codadka ansaxay ee la tiriyey, waxa loo beddelay sidan:

4. **Guddoomiyaha goobtu, markuu caddeeyo ee uu sidaas saxeexiisa ku muujiyo:**

- a) wuxuu waraaqaha cod-bixinta ee wax-kama-jiraanka laga dhigay iyo waraaqaha cabashada ee wakiillada xisbiyada ku ridayaa baqshadda 3^{aad};
- b) wuxuu waraaqaha cod-bixinta ee lagu muransan yahayna ku ridayaa baqshadda 4^{aad};
- c) ugu dambayntiina, wuxuu waraaqaha ansaxay ee la tiriyey ku uruurinayaa baqshadda 5^{aad}.

5. **Hadii sanduuqa cod-bixinta laga helo waraaqo dheeraad ka ah ama ka duwan kuwii goobta lagaga codeeyey, sida iyaga oo aan lahayn shaambaddii goobta, lambarkii waraaqaha cod-**



bixinta ee goobta amaba nooc ahaan aanay ula mid ahayn waraaqaha lagaga codeeyey goobta, hawladeennada goobta cod-bixineed waxay ka dhex saarayaan waraaqaha la tirinayo, waxayna tusayaan wakiilada xisbiyadda ee goobta codbixinta, ka dibna waa la daadinayaa, iyadoo dhacdadaas la diiwaangelinayo.

Qodobka 54^{aad}:

Qoraalka Raadraaca Goobta Cod-bixinta.

Qodobka 54^{aad} ee xeerka ee ka hadlaya qoraalka raadraaca goobta cod-bixinta waxa loo beddeley sidan:

1. *Natiijada raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foomka uu soo diyaariyey komishanka doorashooyinka Qaranku ee ka kooban xaashi asal (original) ah iyo shan xaashiyood oo nuqullo (copies) ah, iyadoo fagaare ahna waxa Guddoomiyaha Goobtu ku dhawaaqayaa:*
 - a) *tirada guud ee ka codaysay goobta,*
 - b) *tirada codadka xumaaday,*
 - c) *tirada codadka lagu muransan yahay;*
 - d) *tirada codadka ansaxay, iyo*
 - e) *tirada ay kala heleen xisbiyada/musharrixiinta tartamay;*
2. *Xaashida asalka ah ee foomka ku xusan faqradda 1^{aad} ee qodobkan waxa loo gudbinayaa Guddoomiyaha Xafiiska Doorashada ee Gobolka, laba nuqulna waxa lagu ridayaa isla sanduuqa ay ku jiraan baqshadaha lingaxan ee ku xusan qodobka 55^{aad}(1 iyo 2) ee xeerka iyo wixii ka hadhay agabkii doorashada waxaana loo gudbinayaa Xafiiska Doorashada ee Degmada, saddexda nuqul ee soo hadhayna waxa la kala siinayaa wakiillada saddexda xisbi.*

Qodobka 55/56^{aad}:

Shaqada Xafiiska Doorashada ee Degmada.

Qodobka 55aad, farqadiisa 3aad ee xeerka oo ku saabsan qaadista iyo wareejinta qalabka doorashada iyo qodobka 56aad, farqadiisa 3aad ee xeerka oo isna ku saabsan Shaqada Xafiiska Doorashada ee Degmada waa la tirtiray.

Qodobka 57aad

Tirinta Cod-bixinta degmada

Qodobka 57aad ee xeerka oo ku saabsan tirinta cod-bixinta Degmada waxa loo beddelay sidan:

Xafiiska Doorashada ee Degmadu, markuu la wareego qalabka goobta doorashada, iyadoo ay goob-joog yihiin wakiillada xisbiyada ee Xafiiska Doorashada ee Degmadu:

1. *Wuxuu hubinayaa inay baqshadaha kala duwani si hagaagsan u lingaxan yihiin;*



2. Wuxuu hubinayaa codadka wax-kama-jiraanka laga dhigay, wixii isbeddel ah ee halkaa ka soo baxana wuxuu ugu kala darayaa xisbiyada/musharrixiinta tartamay;
3. Wuxuu go'aan ka gaadhayaa waraaqaha cod-bixineed ee lagu muransan yahay, iyadoo waraaqaha uu garto in la tiriyo uu xisbiyadu/musharrixiintu siday u kala heleen ugu kala darayo;
4. Wuxuu go'aan ka gaadhayaa sanduuqyada goobaha cod-bixineed ee lagu muransan yahay, natiijooyinka goobaha cod-bixineedna wuxuu ku qorayaa foomamka raadraaca natiijooyinka cod-bixineed ee goobahaas;
5. Sanduuq cod-bixineed wuxuu noqon karaa:
 - a) mid la tiriyo, haddii loo aqoonsado in si sharciga waafaqsan loogu codeeyey;
 - b) wax-kama-jiraan, haddii ay sugnaato in si aan sharciga waafaqsanayn loogu codeeyey;
 - c) waxa waajib ah in sanduuqa lagu murmo xaaladda sugnaanshihiisa lagu go'aamiyo sugnaanshihiisa labada xaaladood ee ku xusan xubnaha "a" iyo "b" ee faqraddan midkood.
6. Go'aanka Xafiiska Doorashada ee Degmadu wuxuu ku ansaxayaa aqlabiyadda fudud ee hawladeennada xafiiska.
7. Haddii uu Xafiiska Doorasho ee Degmadu muranka sanduuqa goobta cod-bixineed ama cabasho ku saabsan waraaqo lagu muransanaa dhammayn kari waayo amaba ay cabasho ka timaaddo dib-u-hubinta waraaqo xafiis doorasho ee goob cod-bixineed wax-kama-jiraan ka dhigay, wuxuu u gudbinayaa sanduuqa iyo warbixintiisa oo qoraal ah ama cabashada Xafiiska Doorashada ee Gobolka oo ku dedaali doona inuu muranka halkaa ku dhammeeyo.
8. Wuxuu isu geynayaa natiijada doorashada ee dhammaan goobaha cod-bixinta ee degmada, waxaanu natiijada raadraaca doorashada ee degmada ku qorayaa foomka loogu tala-galay oo ka kooban xaashi asal ah iyo shan xaashiyood oo nuqullo ah, iyadoo fagaare ahna wuxuu ku dhawaaqayaa:
 - a) tirada guud ee ka codaysay degmada,
 - b) tirada codadka xumaaday,
 - c) tirade codadka lagu muransan yahay
 - d) tirada codadka ansaxay, iyo
 - e) tirada ay kala heleen xisbiyada/musharrixiinta tartamay;
9. Wuxuu u dirayaa Xafiiska Doorashada ee Gobolka xaashida asalka ah ee raadraaca natiijada doorashada Degmada oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee goobaha degmada iyo



nuqulladdii natiijooyinka dhammaan goobaha degmadu, laba nuqulna wuxuu ku ridayaa sanduuqa, saddexda nuqul ee soo hadhayna wuxuu kala siinayaa wakiillada saddexda xisbi ee Xafiiska Doorashada Degmada.

Qodobka 58^{aad}:

Shaqada Xafiiska Doorashada ee Gobolka.

Qodobka 58aad, farqadhiisa 1aad, 2aad iyo 3aad ee xeerka ee ka hadlaya shaqada xafiiska doorashada ee gobolka iyo u-gudbinta natiijada Komishanka Doorashooyinka Qaranka, waxa lagu sameeyay wax-ka-bedelkan:

1. Ereyada ah "markuu helo nuqulka 3^{aad} ee qoraalada raadraaca" ee ku qoran faqradda 1^{aad} ee qodobka 58^{aad} waxa loo beddelay "markuu helo qoraalka raadraaca".
2. *Xafiiska Doorashada ee Gobolku wuxuu ka go'aan-gaadhayaa wixii cabasho ka taagnayd ama lagu muransanaa ee loo soo gudbiyey, iyadoo ay goob-joog yihiin wakiillada xisbiyada tartamayaana, wuxuu isu geynayaa natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolka, waxaanu soo saarayaa:*
 - a) *tirada guud ee codadka laga dhiibtay dhammaan degmooyinka Gobolka,*
 - b) *tirada guud ee codadka xumaaday ee degmooyinka Gobolka.*
 - c) *tirada guud ee codadka ansaxay ee degmooyinka Gobolka,*
 - d) *tirada codadka ay kala heleen xisbiyada tartamay;*

ka dib markuu natiijada doorashada ee gobolka geliyo foomka loogu talagalay, wuxu iyadoo fagaare ah, ku dhawaaqayaa natiijada Doorashada ee Gobolka.

3. *Xafiiska Doorashada ee Gobolku:*
 - a) *wuxuu natiijada raadraaca doorashada ee gobolka ku qorayaa foomka ku xusan faqradda 2 ee qodobkan oo ka kooban xaashi asal ah iyo shan xaashiyood oo nuqullo ah;*
 - b) *xaashida asalka ah, oo uu ku lifaaqan yahay nuqul ka mid ah natiijada doorashada ee degmo kasta oo gobolka ah, wuxuu u dirayaa Maxkamadda Sare;*
 - c) *laba nuqul, oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolkuna, wuxuu u dirayaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka;*
 - d) *saddexda nuqul ee soo hadhayna wuxuu kala siinayaa wakiillada saddexda xisbi ee Xafiiska Doorashada Gobolka.*



Qodob cusub: 59

Adeegsiga iyo dhaqangalka wax-ka-bedelka iyo kaabidda Xeerka Doorashooyinka No. 20/2001

Waxa lagu kordhiyey Xeerka doorashooyinka (Lr. 20/2001) qodob cusub oo ka kooban laba farqadood. Kaas oo u dhigan sedan:

1. Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista xeerka Doorashooyinka Lr. 20/2001, waxa loo adeegsan karaa doorasho kasta oo ku salaysan nidaamka doorasho ee cod-bixiyayaashu diiwaan-gashan yihiin ee laga qabto dalka JSL. *
2. Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista xeerka Doorashooyinka ee Lr. 20/2001 wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu saxeexo Madaxweynaha JSL, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WA BILLAAHI TAWFIIQ.



